PDRC | PUNTLAND DEVELOPMENT & RESEARCH CENTER



Faallo Qoto-dheer:

# Caqabadaha iyo arrimaha mudnaanta leh ee horyaalla Dowladda Puntland ee dib loo doortay

04-2024

https://pdrcsomalia.org/

# TUSMO

| | |
|---|---|
| **TUSMO** | **2** |
| **ERAYO LASOO GAABIYEY** | **3** |
| **1. HORDHAC** | **4** |
| **HABKA DARAASADDA LOO SAMEEYAY** | **4** |
| **2. MUDNAANTA DOWLAD-DHISKA** | **4** |
| **KALA SOOCIDDA AWOODAHA IYO SHAQAALAHA RAYIDKA** | **5** |
| CAQABADAHA | 5 |
| TALOOYIN | 5 |
| **DIB-U-BILAABIDDA GEEDDI-SOCODKA DIMUQRAADIYEYNTA** | **6** |
| CAQABADAHA | 7 |
| TALOOYIN | 8 |
| **XIRIIRKA PUNTLAND IYO SSC** | **8** |
| CAQABADAHA | 9 |
| TALOOYIN | 9 |
| **3. MUDNAANTA NABADDA IYO AMNIGA** | **9** |
| **DIB-U-HESHIISIIN BULSHO** | **9** |
| CAQABADAHA | 10 |
| TALOOYIN | 10 |
| **MAAMULKA HAY'ADAHA AMNIGA** | **11** |
| CAQABADAHA | 11 |
| TALOOYIN | 12 |
| **4. GUNAANAD** | **12** |

| | Erayo Lasoo Gaabiyey | |
|---|---|---|
| | UBR | Ururada Bulshada Rayidka ah |
| | DFS | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| | DDH | Doorashooyinka Dowladaha Hoose |
| | HQHC | Hal Qof, Hal Cod |
| | GSHRP | Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Puntland |
| | GDP | Guddiga Doorashooyinka ee Puntland |

# 1. Hordhac



Iyadoo ay dhawaan doorashooyinkii baarlamaanka iyo madaxweynaha lasoo gabagabeeyay, Puntland—oo ah dowlad-goboleed xubin ka ah dowladda federaalka—ayaa ku jirta marxalad xasaasi ah. Khilaafyada gudaha, walaaca amni, mustaqbalka SSC-Khaatumo, iyo sidoo kale xiriirka ay la leeyihiin Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ayaa caqabado ku ah qorshaha dowlad-dhiska.

Doorashooyinkii dhawaan dhacay ayaa isku dhacyo hubeysan ka dhaliyay magaalooyinka waaweyn ee Puntland, iyadoo rabshado ay ka dhasheen tabashooyin la xiriira sida loo maareeyay doorashooyinkii ka dhacay gobolka. Waxaa intaa dheer, in colaadda Laascaanood ay kordhisay tirada maleeshiyo beeleedyada iyo helitaanka hubka. Balse in hoggaankii joogay dib loo doortay ayaa fursad siinaysaa dib-u-heshiisiin gudaha ah iyo dib-usoo-nooleynta geeddi-socodkii dimuqraadiyeynta ee uu hakadka ku yimid.

Marka la eego caqabadaha siyaasadeed iyo kuwa amni ee cakiran, faalladan qotada-dheer waxa ay qeexeysaa waxyaabaha mudnaanta u leh dowladda cusub ee Puntland. Iyadoo gorfeyneysa caqabadaha iyo fursadaha, faallada waxay soo gudbineysaa aragtiyo la hirgelin karo iyo talooyin loogu talagalay in lagu hago geedi-socodka dowlad-dhiska.

### Habka daraasadda loo sameeyay

Daraasadda ay ku saleysan tahay faalladan waxay uruurinta iyo falanqeynta xogta u adeegsatay nidaamka cilmibaaris ee tayada ku saleysan. Wadarta shan dood-kooxeedyo iyo 20 wareysi oo lala yeeshay dad xog-ogaal ah ayaa lala sameeyay 50 qof oo kala duwan, oo ay ku jiraan xubno ka tirsan xisbiyada siyaasadda iyo baarlamaanka, khuburo sharci, khuburo amni, falanqeeyeyaal siyaasadeed, xubno ka tirsan ururrada bulshada rayidka ah iyo aqoonyahanno. Daraasaddu waxa kale oo ay ka faa'iidaysteen madal loo qabtay ansixinta natiijada daraasadda oo ay ka soo qeyb galeen in ka badan 70 qof, oo ay ka mid yihiin wasiirro ka tirsan xukuumadda, hoggaamiyeyaasha xisbiyada siyaasadda, ururrada bulshada rayidka ah, iyo aqoonyahanno, kuwaas oo dhammaantood jeediyay talooyin wax-ku-ool ah.

Qeybaha xiga ee faalladan qotada-dheer waxa ay u nidaamsan yihiin sida soo socota. Qeybta 2-aad waxa ay qeexaysaa mudnaanta dowlad-dhis ee Puntland, iyadoo u kala qeybsameysa saddex qeybood oo waaweyn: 1) Kala-saaridda awoodaha iyo shaqaalaha rayidka; 2) Dib-usoo-celinta hannaanka dimuqraadiyeynta; iyo 3) Xiriirka Puntland iyo SSC. Mid kasta oo kamid ah qeybahan waxaa lagu gorfeynayaa caqabadaha sida gaarka uu ula kulmayo kadibna waxaa xigaya talooyin ku socda maamulka Puntland oo ku saabsan sida loo xallin karo. Qeybta 3-aad waxay gorfeyneysaa arrimaha nabadda iyo amniga, iyadoo mudnaanta ugu weyn siineyso dhinacyada: 1) dib-u-heshiisiinta bulshada; iyo 2) maamulka hay'adaha amniga. Sidoo kale, caqabadaha iyo talooyinka khuseeya ayaa la qeexayaa. Ugu dambeyntii, qeybta 4-aad waa gunaanad iyo talooyin.

# 2. Mudnaanta dowlad-dhiska

Dowladda Puntland ee dib loo doortay ayaa wajaheysa caqabado is daba joog ah oo dhanka dowlad-dhiska ah kuwaasoo u baahan in si taxadar leh loo tixgeliyo, qorshe istiraatijiyadeedna loo sameeyo. Arrimaha mudnaanta leh waxaa loo qeybin karaa saddex qeybood: 1) Kala-saaridda awoodaha iyo shaqaalaha rayidka; 2) Dib-usoo-celinta hannaanka dimuqraadiyeynta; iyo 3) Xiriirka Puntland iyo SSC.

## Kala soocidda awoodaha iyo shaqaalaha rayidka

In si cad loo kala saaro awoodaha hay'adaha dowladda — hay'ad kasta aragti ahaan waa in ay yeelato howlo u gaar ah—ayaa aasaas u ah hannaanka ay Soomaaliya dooratay ee ah maamul dimoqraadi ah oo xor ah. Dhanka maamulka Puntland, sikastaba ha ahaatee, waxaa meesha ka baxay kala soocnaanta howlaha saddexda laamood ee dowladda. Inkastoo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Puntland oo la aasaasay 2007-dii uu yahay guddiga u xilsaaran maamulka iyo horumarinta shaqaalaha rayidka ah ee Puntland, haddana maamulka dowladda uma muuqdo inuu la shaqeynayo guddigaas.

Sida ay sheegeen dadkii la wareystay, shaqaaleysiinta shaqaalaha rayidka ayaa ah mid aan ku dheelitirneen shaqada iyo haykalka dowladnimo, iyadoo shaqaalaha hay'adaha qaar ay yihiin kuwo aad u badan, qaarna ay aad ugu yar yihiin.

Dowladdu waxay sidoo kale aragtay in qaab-dhismeedka hay'adaha dowladda Puntland ay yihiin kuwo u baahan in dib-u-habeyn lagu sameeyo loona sameeyo waajibaad iyo howlo loo igmaday, haddii la doonayo in ay si karti leh u fuliyaan siyaasadda horumarinta qaranka. Haddaba, haddii la doonayo in la hormariyo shaqaalaha rayidka ah, waa in la hirgeliyaa qaab-sharciyeed ku habboon ee uu ku jiro sharciga shaqaalaha rayidka ah ee Puntland.

### Caqabadaha

- **Kala soocidda awoodaha:** Kala soocidda awoodaha oo xaddidan ee u dhexeeya laamaha dowladda ee fulinta, sharci-dejinta iyo garsoorka.
- **Saameynta qabiilka ku leeyahay shaqaaleysiinta:** Tiirarka siyaasadeed ee Puntland waa awood-qeybsiga beelaha, taas oo iyana saameyn ku yeelatay shaqaaleysiinta shaqaalaha rayidka ah ee dowladda. Arrintan ayaa dhibaato keeneysa marka la hirgelinayo dib-u-habeyn aan la tixgelineyn beelaha. Waxaa intaa dheer, shaqaaleysiinta uu qabiilka ku lug-leeyahay waxa ay saameysay xirfadda shaqaalaha, kuwaas oo ay u badan tahay in aanay noqon kuwo dhexdhexaad ah oo xirfad leh marka ay la macaamilayaan siyaasiyiinta. Sida ay muujiyeen dadkii la wareystay, arrintani waxay u baahan tahay in la sameeyo isbeddel hab-dhaqanka shaqaalaha oo si taxadar leh loo maareeyay.
- **Baaxadda iyo tayada shaqaaleysiinta shaqaalaha rayidka ah:** Marka la eego in shaqaaleysiintu ay taariikh ahaan ku saleysanayd qabiil halkii ay ka ahaan lahayd cadaalad iyo tayo, shaqaalaha dowladda inta badan ma lahan aqoontii loo baahnaa. Tani waxay horseedday in xafiisyo qaar shaqaalaha ku bataan, iyadoo qeyb muhiim ah oo ka mid ah miisaaniyadda dowladda lagu bixiyo mushaarka.[1] Marka la eego tirada shaqaalaha, hay'adaha qaar waxaa ka shaqeeya dad aad u tiro badan, halka hay'adaha qaar ay ka shaqeeyaan dad aad u kooban.
- **Soo jiidashada shaqaale tayo leh:** Dowladdu waxay la halgamaysaa sidii ay u soo jiidan lahayd shaqsiyaad xirfad leh taasoo ay sababtay mushaarka yar oo ay dowladda bixiso marka loo eego hay'adaha aan dowliga ahayn iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Sidoo kale, dowladdu waxay inta badan dib u dhigtaa bixinta mushaaraadka, gaar ahaan sanadka ugu dambeeya ee muddo-xileedka dowladda, maadaama ay isku diyaarineyso doorasho.

### Talooyin

- **Hubinta kala soocidda awoodaha:** Qodobka 58-aad ee dastuurka Puntland waxa uu dhigayaa in laamaha dowladdu noqdaan kuwo kala madax-bannaan. Waa in maamulka cusub uu xaqiijiyaa in qodobkan lagu dhaqo dhammaan heerarka dowladeed. Tallaabooyinka la qaadi karo waxaa ka mid ah ilaalinta madax-bannaanida garsoorka; dejinta habab ballaaran oo kormeerka baarlamaanka ah; iyo kor-u-qaadista wacyiga dadweynaha iyo ka qayb qaadashadooda si loo helo taageero loona xaqiijiyo hufnaanta.
- **Shaqaaleysiinta ku saleysan tayo iyo waxqabad:** Qodobka 128 ee dastuurka Puntland wuxuu xoogga saarayaa in shaqaalaha rayidka ah aysan ku biirin ururrada siyaasadda, iyada oo shaqaaleysiinta lagu saleynayo aqoon iyo waxtar. Dhab ahaantii, qodobkaan lama raacin. Sidoo kale, dowladdu waa in ay mudnaanta siiso awood siinta guddiga shaqaalaha rayidka ah, iyadoo xubnaha guddiga u xuleyso dad karti leh lana aamini karo, kuwaasoo la wareegi kara doorka shaqaaleynta shaqaalaha dowladda iyadoo loo marayo imtixaan iyo tartan furan.

---

[1] Mohamed A, Mohamed, 'Puntland civil service reform: challenges and opportunities', International Journal of Applied Researches 5/12 (2018).

- **Bixinta mushaar cadaalad ah:** kor-u-qaadista waxqabadka shaqaalaha dowladda waxay u baahan tahay mushaar xaq ah oo ku salaysan hawlkarnimo, anshaxa shaqada iyo aqoonta, halkii ay ku saleysnaan lahayd qabiil. Hirgelinta nidaamka dalacsiinta ku salaysan waxqabadka shaqaalaha waxay dhiirigelinaysaa shaqaalaha waxayna horumarinaysaa waxqabadkooda. Intaa waxaa dheer, siyaasadaha la xiriira hawlgabka iyo musharka shaqaalaha da'da ah ee uu waxqabadkoodu hooseeyo waxay fursad u abuureysaa dallacsiinta shaqaalaha da'doodu yar tahay ee kartida iyo waxqabadka leh.

- **In la yareeyo shaqaalaha rayidka, diiraddana la saaro tayada shaqaalaha:** Shaqaalaha rayidka ee Puntland waa kuwo aad u badan, taasoo culeys ku haysa ilaha dhaqaale ee dowladda. Dowladdu waa inay ka fikirtaa yareynta shaqaalaha, iyadoo diiradda saaraysa tayada halka ay tirada diiradda saari lahayd. Tani kaliya ma hagaajineyso hufnaanta oo keliya, waxay sidoo kale sare u qaadeysaa in ay bulshada hesho adeeg tayo leh. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in mudnaanta la siiyo dejinta siyaasadaha shaqo abuurka iyo horumarinta fursado shaqo oo kala duwan.

## Dib-u-bilaabidda geeddi-socodka dimuqraadiyeynta

Puntland waxay bilowday hannaanka dimuquraadiyeynta oo muddo la sugayey, iyadoo muwaadiniintu ay awood u yeesheen in xubnaha golaha deegaanka ay doorasho qof iyo cod ah ku doortaan. Bishii May 2023, geeddi-socod dheer oo dhib badan oo socday muddo 25 sano ah kadib, Puntland waxay doorashadii ugu horreysay ee dowladaha hoose ka qabatay 33 degmo. Doorashadan ayaa soo if-bixisay kala qeybsanaan siyaasadeed.

Markii ay soo dhawaatay xilliga doorashada, mucaaradka ayaa abaabulay maleeshiyaad, taasoo sababtay iska-hor-imaadyo dhowr ah oo ay ka dhasheen dhimasho, dhaawac iyo burbur hantiyeed. Maleeshiyaadka ayaa sidoo kale fariisimo ka sameystay goobo istaraatiiji ah oo ku yaalla gudaha iyo duleedka magaalada Garoowe si ay u hor istaagaan in agabka doorashada loo daabulo gobollada. Dhanka kale, shacabka ayaa magaalada Garoowe ka abaabulay mudaaharaadyo ay ku dalbanayeen in doorashada la hakiyo ilaa inta heshiis lagala gaarayo mucaaradka. Dhacdooyinkan kala duwan ayaa sababay in dib loo dhigo doorashada saddex degmo, inkastoo doorashada 30-ka degmo ee kale ay ku socotay sidii loo qorsheeyay.

Markaas kadib, dowladda waxay soo jeedisay wax-ka-beddel in lagu sameeyo dastuurka oo la rabay in lagu hagaajiyo geeddi-socodka doorashada. Diidmada wax-ka-beddel lagu sameeyo dastuurka Puntland—iyadoo dadka dhaliilayay ay sheegayeen in ay suuragal tahay in Madaxweynaha Puntland Deni uu muddo kororsi raadinayay—waxaa ka dhashay iska-hor-imaad hubeysan oo hal maalin magaalada Garoowe ku dhex maray maleeshiyaad taabacsan mucaaradka iyo ciidamada dowladda. Sikastaba ha ahaatee, dowladdu waxay sii ambaqaadday dhismaha Guddiga Doorashada Puntland, kaasoo loo xil saaray qorsheynta doorashada madaxweynaha iyo baarlamaanka. Iyadoo labada xisbi siyaasadeed (Horseed iyo Mideeye) ay diideen inay soo magacaabaan xubnaha uga mid noqonaya Guddiga Doorashada Puntland, isimada iyo hoggaamiyeyaasha beelaha kale oo ku baaqay in la qabto doorashooyinka xildhibaanada oo ku saleysan beelaha, iyo iyadoo 8-da Janaayo 2024 ee xilliga doorashada uu aad usoo dhawaanayay, Madaxweyne Deni ayaa ugu dambeyntii cadaadis lagu saaray in lagu dhawaaqo dib ugu laabashada nidaamka soo-xulista xildhibaannada beelaha ku saleysan ee soo jireenka ahaa.

Sida ay sheegeen xubno ka tirsan Ururrada Bulshada Rayidka ah oo la wareystay, dib-u-doorashada Siciid Deni ee madaxtinimada Puntland ayaa rajo wanaagsan u abuureysa dib-usoo-celinta hannaanka dimuqraadiyeynta. Arrinkan ma ahan keliya in Deni uu maareeyay in uu doorasho ka qabto 33 degmo (30 degmo oo 2023 ah iyo 3 degmo oo 2021 ah), balse arrinka ayaa ah in guddoomiyihii hore ee kumeelgaarka ahaa ee Guddiga Doorashooyinka Puntland loo doortay guddoomiyaha baarlamaanka Puntland, halka xoghayihii hore ee xisbiga KAAH loo doortay madaxweyne ku xigeenka Puntland. Shakhsiyaadkani waxay ahaayeen kuwo muhiim u ah doorashooyinka dowladaha hoose waxayna khibrad dheeraad ah ka heleen ka qeyb ahaanshaha geedi-socodka.

Marka la eego arrimahan, waa suuragal in la rajeeyo in madaxweynaha — oo horey u hirgeliyey dimoqraadiyeynta — uu mudnaanta siin doono qabasha doorashooyin qof iyo cod ah ee goleyaasha dowladda (baarlamaanka iyo madaxweynaha). Waxaa arrinkan xoojinaya: 1) rabitaanka dadka ee ah in laga guuro nidaamka ku saleysan qabiilka oo la ogaaday xilligii la qabanayay doorashadii dowladaha hoose;[2] 2) Dib-u-doorashada Madaxweyne Deni waxa ay siinaysaa muddo ku filan oo dib-u-eegis iyo dhammaystir lagu sameeyo hannaanka doorasho ee qof iyo cod iyadoo aysan jirin khilaaf ka dhashay muddo kororsi; iyo 3) waxaa jira diyaargarow dhanka hannaanka dimuqraadiyadda ee mustaqbalka.

## Caqabadaha

- **Khilaafaadka ku saabsan qaab-dhismeedka sharci ee doorashooyinka:** Waa in dib-u-eegis lagu sameeyaa is-burinta ka jirta qaab-dhismeedka sharci, gaar ahaan wixii ka dambeeyay wax-ka-beddelkii dastuurka ee Luulyo 2023.[3]

- **Wacyiga dadweynaha ee hannaanka doorashada oo hooseeya:** Inkastoo baahida loo qabo dimuqraadiyeynta iyo wax-ka-beddelka siyaasadeed ee Puntland ay sarreyso, weli waxaa jira farqi weyn ee xagga fahamka dadweynaha ah ee hannaanka doorashada iyo saameynta ay yeelan karaan. Wacyi la'aantan ayaa si gaar ah u soo shaac baxday intii lagu jiray doorashooyinka dowladaha hoose, iyadoo muwaadiniin badani aysan ogeyn kaalinta xafiisyada siyaasadeed ee kala duwan ama muhiimada codkooda uu leeyahay. Caqabaddu waxay ku jirtaa daboolidda baahida aqooneed iyadoo ujeedadu tahay hubinta ka qeybgalka muwaadin xog-ogaal ah oo dhiiran ee geeddi-socoka doorashooyinka mustaqbalka.

- **Kala qeybsanaanta siyaasadeed ee doorashadii dowladaha hoose kadib:** Doorashada dowladda hoose ee Puntland waxay sii kordhisay kala qeybsanaan xooggan oo ka dhex aloolsan kooxaha siyaasadda, gaar ahaan magaalooyinka muhiimka ah sida Boosaaso iyo Garoowe. Khilaafkan ma hor istaagin oo keliya dowlad-dhis waxtar leh balse waxa uu ku sigtay in uu isku beddelo ismariwaa siyaasadeed oo daba dheeraada. Waxa uu khilaafka sidoo kale horseeday in ay soo baxaan kooxo hubeysan oo go'aansaday in ka hor yimaadaan in ay dowladda keliya leedahay isticmaalka awood ciidan. Iyadoo tani ay caqabad weyn ku tahay maamulka cusub ee Puntland, ayaa haddana waxaa muuqata in kala qeybsanaantii soo if-baxday xilligii doorashooyinkii dowlaha hoose ay hoos u dhacday kadib qabashadii doorashadii madaxtinimada.

- **Xisbiyo siyaasadeed oo shaqsiyadeysan:** koobnaanta xisbiyada siyaasadda, oo ay keliya kooxo yar iyo/ama shakhsiyaad ay keli ku yihiin go'aan qaadashada, ayaa hoos u dhigtay ka qeybgalka, taasoo keentay in xisbiyada ay noqdaan kuwo ku saleysan shakhsiyaad halkii ay ku salaysnaan lahaayeen aragti dowlad-dhis. Tani waxay wiiqi kartaa geeddi-socodka dimuqraadiyeynta, oo ay ka mid tahay abuurista qaab-dhismeed siyaasadeed oo loo dhan yahay.

- **Saameynta doorashooyinka federaalka:** Hannaanka doorashada federaalka ee Soomaaliya ee socday—gaar ahaan doorashadii xildhibaannada aqalka hoose iyo aqalka sare—waxay indhaha dowladda Puntland iyo siyaasiyiinta ka weecisay hannaanka dimuqraadiyeynta ee heer dowlad-goboleed.

---

[2] See perceptions surveys, see: https://pdrcsomalia.org/Publications/survey-of-public-perceptions-report-on-local-government-elections-in-puntland/ and https://pdrcsomalia.org/Publications/puntland-local-council-elections-and-the-role-of-the-political-associations/.

[3] For more information on the amendment, see: https://pdrcsomalia.org/Publications/puntland-constitutional-amendment-analysis-of-changes-effects-and-prospects-of-application/.

## Talooyin

- **In la sameeyo dib-u-eegis sharci oo dhameystiran:** Waa in maamulka cusub ee Puntland uu dhisaa guddi dib-u-eegis ballaaran ku sameeya qodobada iska hor imaanaya, madmadowga iyo daldaloollada ka jira qaab-dhismeedka sharci ee shuruucda doorashooyinka iyo wax-ka-beddelka dastuurka. Marka la sameynayo dib-u-eegista, waa in guddiga uu la tashiyo la yeeshaa khubarada sharciga, xisbiyada siyaasadda, Ururada Bulshada Rayidka ah iyo daneeyeyaasha kale ee ay khuseyso, si loosoo uruuriyo aragtiyo iyo talooyin kala duwan.

- **In la billaabo olole waxbarashada madaniga ah:** Waa in la hirgeliyo olole waxbarasho madani ah oo mug leh oo dadweynaha lagu barayo hannaanka doorashada, kaalinta saraakiisha la soo doortay iyo muhiimadda ay cod bixinta leedahay. Ololahan oo kale waa in uu gaaraa dad badan iyadoo la adeegsanayo qalab isgaarsiineed oo kala duwan, oo ay ku jiraan idaacadaha, kulamada dadweynaha iyo agabyada macluumaadka lagu gudbiyo. Waa in waxbarashada madaniga ah iyo waxbarashada cod-bixinta lagu daraa manhajka dugsiyada.

- **Dhameystirka doorashooyinka goleyaasha deegaanka ee degmooyinka haray:** Dib-u-bilaabidda geedi-socodka doorashooyinka dowladaha hoose ee degmooyinka aan weli doorasho ka dhicin—iyadoo laga billaabayo saddexdii degmo ee gobolka Nugaal ee doorashadooda dib loo dhigay—waxay gacan ka gaysanaysaa dib-usoo-nooleynta daneynta iyo mudnaanta bulshada. Waxaa sidoo kale xusid mudan in saddexda degmo —Qardho, Eyl iyo Ufeyn — oo ay horay doorashooyin uga dhaceen, dhawaan lagu wado in ay ka dhacaan doorashooyin kale oo cusub. U diyaar garowga iyo is-waafajinta doorashooyinka goleyaasha deegaanka ayaa fiiro gaar ah u baahan.

- **Fududeynta wada-hadal iyo dib-u-heshiisiin:** Waa in la qabtaa madallo iyo wada-hadallo u dhexeeya xoogagga siyaasadda iyo waxgaradka bulshada si loo xalliyo tabashooyinka, korna loogu qaado is-fahamka iyo dib-u-heshiisiinta. Si loo helo aqbalaad ballaaran, waa in dhammaan daneeyayaasha ay khuseyso — oo ay ka mid yihiin ururrada bulshada rayidka ah; odayaasha magaca leh iyo hoggaamiye beeleedyada; culimada; iyo siyaasiyiinta mucaaradka ah – ay ka qeybgalaan wadahadallada ku saabsan dib-u-eegista dastuurka ama wax-ka-beddelka sharciyada.

- **Hubinta metelaad cadaalad ah, loo dhanyahay iyo sii socosho:** Waa in siddeeda xisbi siyaasadeed ay helaan muddo toban sano ah halkii ay ka heli lahaayeen muddo shan sano ah, si loogu oggolaado inay ka qeyb galaan labo wareeg doorasho. Intaa waxaa dheer, geeddi-socodka dimuqraadiyeynta waa in uu hubiyaa metelaadda iyo ka-qeybgalka dhammaan heerarka kala duwan – lagasoo billaabo dhismaha xisbiyada siyaasadda ilaa maamulka iyo natiijada doorashooyinka.

- **Isku-dheelitirka mudnaanta doorashada:** Waa in maamulka cusub ee Puntland uu xaqiijiyaa in uu xoogga saaro dimuqraadiyeynta dowlad-goboleedka iyo dib-u-habeynta maamulka, iyadoo isku-dheelitir habboon loo sameynayo ka-qeybqaadashada hannaanka doorasho ee federaalka iyo wax-ka-qabashada maamulka gudaha iyo baahiyaha doorasho.

## Xiriirka Puntland iyo SSC

Soo if-bixitaanka Maamulka SSC-Khaatumo waxay caqabad ku tahay qaab-dhismeedka dowladeed ee Puntland. Odayaasha dhaqanka SSC ayaa ku dhawaaqay in ay iyagu ka bexeen haykalka dowladnimo ee Puntland, iyo in ay dhisayaan maamul madax-bannaan oo ka arrimiya gobollada SSC. Tallaabadan ayaa dhalisay dood dastuuri ah oo ku saabsan doorashooyinka iyo midnimada dhuleed.

### Caqabadaha

- **1.Ka bixitaan hal dhinac ah:** Ka bixitaanka halka dhinac ah ee odayaasha SSC ayaa dhaliyay su'aalo la xiriira aqbalaadda go'aankooda. Tani waxaa sabab u ah in ku biiristooda Puntland loo maray wada-hadal iyo heshiisyo adag, wixii ka bixitaan ahna loo marayo si la mid ah. Ka bixitaankooda ayaa saameyn ku yeeshay midnimada dhuleed ee Puntland, sida uu qabo dastuurka, gobollada ay degaan Dhulbahante ayaa ka mid ah dhulka Puntland, nidaamka awood qeybsiga ayaana ku saleysan.

- **Saameynta Dastuurka:** In SSC-Khaatumo ay noqoto maamul madax-bannaan waxay u baahan tahay in dib-u-eegis lagu sameeyo baaxadda dhulka Puntland ee ku qoran dastuurka Soomaaliya iyo dhammaan sharciyada kale ee khuseeya. Waa in sidoo kale wax laga beddelaa habka awood qeybsiga ee lagu dhaqmo, iyadoo beelaha qaar ee Puntland jooga laga yaabo inay helaan metelaad ka badan inta ay hadda heystaan.

- **Ka bixitaan iyo metelaad siyaasadeed:** Inkastoo odayaashii SSC ay ku celceliyeen in ay ka bexeen Puntland, metelaadda SSC ee Puntland waxba iskama beddelin doorashadii 2024 ee dhawaan dhacday.

### Talooyin

- **In la dhiso guddi isku-dhaf ah:** Sameynta guddi daraaseeya fikradaha kala duwan soona bandhigaan xulashooyin ayaa masuuliyiinta ka caawin karta inay go'aanno xog-ogaalnimo iyo xog ku dhisan qaataan. Guddigan ayaa sidoo kale fududeyn kara wada xaajoodyada iyagoo diiradda la saarayo dib-u-heshiisiinta iyo nabadeynta.

- **La xiriiridda hoggaanka dhaqanka iyo siyaasiyiinta SSC:** Dowladda Puntland waa in ay wada-hadal macno leh la yeelato madaxda SSC haddii ay dooneyso in ay go'aan ka gaarto in SSC-Khaatumo ay ka go'do ama ka mid ahaato Puntland. Natiijada kasoo baxda wada-xaajoodka ayaa horseedi karta in dib loo soo celiyo Puntland-tii 'weyneyd' ama lagu heshiiyo kala go' la isku raacsan yahay oo la xiriirta mas'uuliyado la wadaago ee dhinacyada sida difaaca iyo dhaqaalaha, iyadoo loo marayo hannaan dhowr waji leh oo lagu daadejinayo awoodaha, lagu wareejinayo hantida laguna caddeynayo xuduudaha maamulka.

## 3. Mudnaanta nabadda iyo amniga

### Dib-u-heshiisiin bulsho

Inkastoo aysan wax cusub ahayn khilaafyada siyaasadeed ee xilliyada doorashada, doorashadii xildhibaannada baarlamaanka oo qorsheysneyd bishii Janaayo 2024 waxa ay si gaar ah u dhaliyeen khilaaf ka dhashay: 1) Hubanti la'aanta nooca doorashada madaxweynaha iyo baarlamaanka; 2) Doorashooyinkii dowladaha hoose oo la isku khilaafay; iyo 3) soo jeedin wax-ka-beddel qaar ka mid ah sharciyada iyo dastuurka.

Taariikh ahaan, odayaasha dhaqanku waxa ay ahaayeen tiirarkii dowladnimada Puntland, iyagoo dhexdhexaadin sameyn jiray sidoo kalena xal keeni jiray xilliyada ay khilaafyada siyaasadeed jiraan. Sikastaba ha ahaatee, tan iyo sanadkii 2014, waxaa xoogeysanayay kala qeybsanaanta odayaasha, iyadoo ay soo wajahday khilaaf siyaasadeed oo la xiriira cidda loo magacaabayo xilalka beelaha. Kala qeybsanaantan ayaa sii kortay bishii Nofeembar 2023 kadib markii qaar ka mid ah odayaasha ay kulmeen si cadna ugasoo horjeesteen doorashadii tooska ahayd ee golaha baarlamaanka iyo madaxtooyada ee uu hormuudka ka ahaa Madaxweyne Deni, halka qaar kalena ay go'aansadeen inay ka aamusaan.

Doorashada kahor, siyaasiyiinta iyo Ururada Bulshada Rayidka ah ayaa u ololeeyay shirweyne dib-u-heshiisiineed oo ay ka soo qeybgalayaan dhammaan daneeyeyaasha, si xal loogu raadiyo ismari-waagii taagnaa. Intaa waxaa dheer, qaar ka mid ah dadka ku jira saaxadda siyaasadda ayaa carabka ku adkeeyay baahida loo qabo in doodo macno leh laga yeesho mustaqbalka Puntland, doodahaasoo ka baaxad weyn wada-hadal siyaasadeed oo keliya. Kahor inta aysan tallaabo qaadin Ururada Bulshada Rayidka ah ama dowladda Puntland, waxaa lagu dhawaaqay doorasho loo marayo hannanka dhaqanka ee soo jireenka ah. Tani waxa ay yareysay xiisaddii isasoo tareysay, iyadoo fududeysay in doorashada madaxtinimada Puntland —oo mar labaad dib loo doortay madaxweynaha talada hayay — ay si nabad ah u qabsoonto.

Inkastoo ay jiraan caqabado hortaagan maamulka cusub, haddana waxaa xusid mudan in ay jiraan tallaabooyin horay loo qaaday oo lagu ammaani karo, sida isku daygii madaxweynaha ee ahaa in uu la xiriiro madaxda bulshada iyo dhisidda gole wasiirro oo loo arko in loo dhan yahay.

## Caqabadaha

- **Qanacsanaan la'aan siyaasadeed:** Doorashadii federaalka ee 2022-kii iyo doorashooyinkii goleyaasha deegaanka ee xigay waxay xoojiyeen khilaafka siyaasadeed ee ka dhex jira Puntland. Qaar kamid ah siyaasiyiinta iyo xisbiyada mucaaradka ah iyo sidoo kale beelaha iyo madax dhaqameedka ayaa shirar ay yeesheen ku sheegay in laga saaray goleyaasha go'aanka lagu gaaro. Waxay sidoo kale saluugeen jihada uu u socdo nidaamka siyaasadeed ee Puntland.

- **Walaac amniga ee gudaha iyo xuduudaha:** Iska-horimaadyadii ka dhashay khilaafkii wax-ka-beddelka dastuurka iyo doorashooyinkii dowladaha hoose weli lama xallin; sidoo kale muwaadiniintii hantidooda ku burburtay dagaalladii Boosaaso iyo Garoowe wax mag-dhow ah lama siinin. Waxaa intaa dheer, iska-horimaadyada u dhexeeya beelaha gudaha Puntland iyo xuduudaheeda (Soomaaliland iyo Galmudug) ayaa kordhay sanadkii 2023.[4] Xasilooni-darrada ayaa wiiqeysa dadaallada lagu doonayo dib-u-heshiisiinta bulshada iyo nabad kuwada noolaanshaha.

- **Baabi'inta hababka oday-dhaqameedyada ee xallinta khilaafyada:** Dhaqan ahaan, Puntland waxay ku tiirsanayd xigmadda iyo awoodda madax-dhaqameedkeeda oo xallin jiray khilaafyada sidoo kalena ka shaqeyn jiray wadajirka bulshada. Siyaasadeynta magacaabista beelaha iyo kala qeybsanaanta u dhexeysa odayaasha ayaa wiiqday doorkoodii dhexdhexaadnimo. Tani waxay meesha ka saartay kaalintoodii ahayd xallinta khilaafyada, taasoo ugasii dareysa xiisadaha.

## Talooyin

- **Dhisidda guddi ka shaqeeya dib-u-heshiisiinta bulshada:** Waa in dowladda Puntland ay dhisto guddi madax-bannaan oo u xilsaaran in ay fududeeyaan dadaallada wada-hadallada, dhexdhexaadinta iyo dib-u-heshiisiinta xoogagga siyaasadeed. Waa in guddigaas uu metelaad ballaaran ka helaa qeybaha kala duwan ee bulshada, sidoo kalena xaqiijiyaa kasbashada beelaha iyagoo qabanaya shirweyne dib-u-heshiisiin oo ay ka qeybgalayaan dhammaan dhinacyada ay khusayso, oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha siyaasadda, odayaasha dhaqanka, bulshada rayidka ah iyo dhalinyarada.

- **Ballanqaad fulin:** Maamulka Puntland waa in ay ka go'naataa fulinta xalalka iyo heshiisyada ay guddiga dib-u-heshiisiinta bulsha ay soo bandhigaan.

- **Waxbarashada madaniga ah ee nabadda:** Waxbarashada madaniga ah waxay gacan ka geysaneysaa kobcinta dhaqanka nabadda, wada noolaanshaha, dulqaadka iyo aqbalaadda bulshada dhexdeeda. Waa in dowladdu ay sidoo kale waxbarashada madaniga ah ku dartaa manhajyada dugsiyada.

- **In la sameeyo hindiseyaal nabad-dhis oo heer bulsho ah:** Taageeridda iyo maalgelinta hal-abuurro nabad-dhisid oo ay hoggaaminayaan bulshada– oo ay ku jiraan guddiyada nabadda, kulamo aqoon-is-weydaarsi iyo wadahadallo looga hadlayo xallinta khilaafaadka – ayaa gacan ka geysan doona kobcinta fahamka iyo dib-u-heshiisiinta heerka dowladaha hoose.

- **Sameynta iyo taageeridda hab digniin & jawaab-celin ah ee khilaafyada:** Iyadoo taageero ka helaysa hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, waa in dowladdu ay qaadataa mas'uuliyadda ay kusoo bandhigeyso kuna joogteyneyso hab waxtar leh oo digniino iyo jawaab celin loogu sameynayo khilaafyada.

---

[4] The total number of conflicts recorded in Puntland during 2022 was 129 (ACLED, 2022). By contrast, in 2023, ACLED counted 279—an increase of 116.27%. Of these conflicts, 94 took place in the SSC cross-border region with Somaliland, while 106 took place in the Mudug cross-border region with Galmudug. This means cross-border conflicts accounted for 71.68% of the 2023 conflicts recorded in Puntland.



## Maamulka hay’adaha amniga

Ciidamada ammaanka ee Puntland—oo dowlad-goboleedku si gooni u leeyahay kana baxsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya—ayaa wajahaya khataro amni. Waxaa kamid ah: 1) colaadda SSC, halkaas-oo aan weli la xalin khilaafyada kala dhexeeya Soomaaliland ee Sool, Sanaag iyo Cayn, ayaa horseeday in hub badan la keeno iyo abaabul maleeshiyaad aan hay’ad gaar ah ka amar qaadan; 2) in deegaannada buuraleyda ah ee gobollada Bari iyo Sanaag ay ku sugan yihiin kooxaha xagjirka ah sida Daacish iyo Al-Shabaab, iyo suuragalnimada dareenka ah in xubno ka tirsan Al-Shabaab (oo ka cararaya dagaalka ka socda Galmudug) ay Puntland ka soo galaan dhanka koonfureed; iyo 3) In ay jiraan ciidamo amni oo isbar-bar socda, sida Ciidanka Amniga Puntland iyo Ciidanka Badda Puntland, oo aan heysan sharciyad.[5]

### Caqabadaha

- **Dambiyo abaabulan:** Tani waxa ay isugu jirtaa dembiyada ay geystaan al-Shabaab/Daacish, burcad-badeedda iyo kooxaha dadka tahriibiya.

- **Tafaraaruq iyo daacadnimo qeybsan:** Jiritaanka kooxo kala duwan oo ku dhex jira hay’adaha amniga Puntland, oo inta badan u abaabulan qaab qabiil, ayaa horseeday kala qeybsanaan waxa ayna caqabad ku yihiin nidaam amar-qaadasho mideysan. In taliyeyaasha amarkooda loo hoggaansamo ayaa mararka qaar ka miisaan culus amar-ka-qaadashada ciidanka ee masuuliyiinta dowlad-goboleedka.

- **Isbaarooyin:** Isbaarooyin aan sharciga ahayn ayaa mararka qaar soo if-baxay muddadii khilaafka siyaasadeed uu jiray ama la arkaa marka ay ciidamada anmaanka la kulmeen dib-u-dhac ku yimaada mushaarkooda. Dhacdooyinkan waxay caqabad ku yihiin isusocodka bulshada iyo ganacsiga.

- **Khamriga iyo maandooriyaha:** Sare-u-kaca kooxaha maandooriyaha iibiya, oo ay weheliyaan isticmaalka khamriga iyo maandooriyaha ee xubno ka tirsan hay’adaha amniga, ayaa gacan ka geystay sare-u-kaca dembiyada iyo guud ahaan dareenka amni darro, oo gaar ahaan ka jira magaalooyinka waaweyn.

- **Hubka oo batay:** Puntland waxa ay la daalaa-dhacaysaa hubka oo ku sii badanaya gacanta shacabka. Xaaladdan waxaa kor usii qaaday dagaal beeleedyo iyo xiisadaha ka taagan xuduudaha.

[5] Peter Albrecht, ‘The interplay of interventions and hybridization in Puntland’s security sector’, Cooperation and Conflict 58/2 (2018): 11.

### Talooyin

- **In la sameeyo qaab-dhismeed sharci oo qeexaya kaalinta iyo masuuliyadaha hay'adaha amniga Puntland:** Dowladda Puntland waa inay diyaariso sharci/sharciyo si cad u qeexaya waajibaadka, haykalka amar qaadashada iyo hababka kormeerka ee lagu maamulayo qeybaha kala duwan ee hay'adaha amniga Puntland. Tusaale ahaan, ciidamada waxa loo qaabeyn karaa talis bari, talis dhexe iyo talis konfureed.

- **Bixinta tababaro iyo awood-dhis:** Waa in shaqaalaha ammaanka ay si joogto ah u qaataan tababarro ku saabsan xirfadda, anshaxa iyo xallinta khilaafyada. Arrinkan ma xoojin doonto xirfadahooda oo keliya marka ay maareynayaan xaalado kala duwan, balse waxa uu sidoo kale kor u qaadayaa dareenka hiigsi la wada leeyahay. Si taas loo gaaro, waa in dowladda ay dejisaa qorshe tababar iyo manhaj waxbarasho oo dhameystiran.

- **Dhaqan-gelinta siyaasad lagu mamnuucayo maandooriyaha:** Siyaasado lagu mamnuucayo isticmaalka khamriga iyo daroogada ee ciidamada ammaanka — iyadoo la sameynaayo baaritaanno joogto ah iyo tillaabooyinka edbin ah—waa in si degdeg ah loo hirgeliyo.

- **In la sameeyo barnaamijyo wacyigelin iyo dhaqancelin:** Waa in shaqaalaha amniga ee qabatimay balwadda loo qabtaa barnaamijyo waxbarasho oo ku saabsan khatarta isticmaalka maandooriyaha iyadoo loo marayo adeegyada dhaqancelinta iyo la-talinta.

- **Dhisidda iskaashi amni ee xuduudaha:** Haddii dowladda ay dooneyso in ay wax ka qabato ka ganacsiga hubka ee xuduudaha, waa in ay xoojisaa iskaashiga gobollada iyo dalalka deriska la ah Puntland, iyadoo sidoo kale la xoojinayo ilaalinta xuduudaha gobolka.

- **In la hirgeliyo qorsheyaal hub-ka-dhigis, ka saarid iyo dib-u-dhexgalid ah:** Maleeshiyooyinka beelaha waa in lagu daraa qaab-dhismeedka amniga dowladda, iyadoo lagu dhiirigelinayo inay si ikhtiyaar ah hubka u soo dhiibaan.

## 4. Gunaanad

Xaaladda Puntland ee dowlad-dhiska, nabadda iyo dib-u-heshiisiinta waxa ay muujineysaa jiritaanka caqabado u baahan fikir istiraatiiji ah, qorsheyn caqliyeysan iyo dadaallo wadajir ah oo ay hoggaamiso xukuumadda cusub ee la doortay. Dhinac kasta oo kamid ah dhinacyada dowlad-dhiska, nabadda iyo amniga ee faalladan lagu falanqeeyay waxa lagusoo bandhigay caqabadaha iyo fursado labadaba.

Iyadoo la wajahayo caqabadahan kala duwan lana hirgelinayo istaraatiijiyadaha lagu taliyay, maamulka Puntland waxa uu muwaadiniinta u gogol-xaari karaa mustaqbal xasiloon, barwaaqo ah oo loo dhanyahay. Sidaas darteed, dowladdu waa in ay dadaal kasta sameysaa si ay mudnaanta u siiso dhinacyada la iftiimiyay, ka qeybgeliso daneeyeyaasha, kana shaqayso sidii horumar waara looga gaari lahaa dhinacyada dowlad-dhiska, nabadda iyo dib-u-heshiisiinta; dhaqaalaha iyo kaabayaasha dhaqaale; iyo adeegyada bulshada.

PDRC

PUNTLAND DEVELOPMENT & RESEARCH CENTER